

Kaaliyaha Maamulka Xafiiska Caafimaadka – Dhismaha John Marshall Shuruudaha*: *Saynis ama dhibcaha kubedelashada Xisaabta; dhibcaha kulliyada Free TechPrep; shahaadooyinka warshadaha; waa lacag dheeraada***

Kaaliyaha Xafiiska Maamulka Caafimaadka (AMOA) waa ballaarinta joogtada ah ee xirfadaha caafimaadka ee muhiimka u ah daryeelka bukaan-socodka iyo fududeynta hawlaha xafiisyada caafimaadka, rugaha caafimaadka ama isbitaalada. Takhasusyaashani waxay caawiyaaan shaqaalaha caafimaadka huwanta iyagoo buuxinaya macluumaadka muhiimka ah, qabashada bukaanka, diiwaanka elektarooniga ah, iyagoo isticmaalaya qalabka xafiiska caafimaadka, iyo u shaqeyda sida kormeerayaasha shaqaalaha. Marka aad dhammeeyso Tababarka Caafimaadka huwanta, waxay ku siin karaan shaqo degdeg ah oo laga yaabo inay tahay shaqo waqti-dheer.

Aerospace Science & Technology: Warshadaha Dugsiga Sare Rainier Beach *Ma laha shuruuddo; Dhibcaha Kubedelashada Xisaabta; dhibcaha kulliyada free Tech; shahaadooyinka warshadaha*
Seattle waxay hoy u tahay shirkadda dunida ugu weyn ee diyaaradaha iyo qaar badan oo ka mid ah warshadaha taageeraya. Ka bilow xirfadaada iyo aqabka kulliyadaha adigoo baranaya sida loo dhiso, looga shaqeeyo, iyo wax looga beddelo qaybaha diyaaradaha iyo diyaaradda. Barto badbaadada, aqoonsiga qalabka & isticmaalka saxda ah, rakibaadda guntinta, aluminium iyo qodista birta titanium, iyo khibrada warshadaha iyo dhibcaha jaamicadda.

Automotive Technology - Goobta waa la go'aamin doona *Ma laha shuruuddo; Ma laha dhibcaha kubedelashada; Iskudiyarinta dhibcaha Kulliyadda Free TechPrep; shahaadooyinka warshadaha*
Ma danaynaysaa in aad dhigato fasal gacan-kuhayna oo kaaga baahan in aad si muhiim ah u fikirto iyo sidoo kale leh xisaha warshadaha gawaadhida? Hel asaas adag oo ah farsamada gaadiidka iyo xirfado shaqo oo faa'iido leh. Waxaad ku baran doontaa nidaamka brake-ga, dayactirka, iyo nidaamyada kale ee ka shaqeeya gaariga gudahiisa. Hel shahaado soo buuxinaysa baahida warshadaha. Dhibcaha kulliyada ayaa lagu kasbadan kara barnaamijkan.

Shaqooyinka Dhismaha - Dugsiga Sare ee Rainier Beach *Ma laha shuruuddo; Ma laha dhibco ku bedelashada; shahaadooyinka warshadaha*
Barnaamijkaani wuxuu bixiyaa khibrad xid ah iyo loo marayo waxbarashada iyo fasalka gacan-kuhaynta dhismaha mashaariida sida guryaha yaryar ee dadka guri la'aanta ah. Shaqooyinkaas xirfadaha leh waxaa ka mid ah farsamada gacanta sida nijaarka, tuubistaha, korontoyacaanka, rinjiile iyo kuwo kale oo dheeraad ah. Dhammaan wejiyada dhisidda dhismaha waa lagu daboolaya. Marka ay dhameeyaan tababarkan, ardayda waxaa laga yaaba inay fursad u helayaan inay ka qayb qaataan barnaamijka shaqo-barashada. Dugsiga sare ka dib, ardaydu waxay fursad u leeyihiin inay u suurawdo inay si toos ah u galaan shaqo-barashada.

Fanka Cuntokariska - Dugsiga Sare ee Rainier Beach *Shuruudaha qalitaanka*; Ma laha dhibco iskubedelasho; shahaadada warshadaha; waa lacag dheeraada***
Martigelinta waa mid ka mid ah meelaha sida ugu dhaqsiyaha badan u sii kordhaya ee deegaanka Seattle. Ku soo biir fasalka xiisaha iyo hawlaha badan ee xirfada cuntokariska, iyo isku diyaari xirfadaha hawlgallada cuntada, maqaayadaha, dubitaanka, iyo warshadaha kale ee adeegga cuntada. Tababarka horumarsan waxaa ka mid ah diyaarinta cuntada, fanka cuntokariska, iyo bandhigidda cuntada, amniga, nidaamfadda, shaqo barashada, xirfadaha shaqada oo ay ku jiraan xafadaha iyo diyaarinta waxbarashada heerka warshadaha.

Digital Animation: Game Design - Xarunta Seattle ee AIE *Shuruudaha*; Dhibcaha Kubedelashada Fine Arts; dhibcaha kulliyada; shahaadooyinka warshadaha*
Samee animation iyo games! Wax kabaro sketching iyo storyboarding animation 2D iyo fikradaha 3D, barto xirfadaha lagama maarmaanka u ah shaqada warshadaha animation iyo games-ka. The Academy of Interactive Entertainment (AIE) waa baraha hogaaminaya Horumarinta Computer Game iyo warbaahinta digitalka ee 3D. Kulliyadani waa xiddigta 3D animation, sameynta games-ka, iyo muuqaalka FX. Koorsadani waa diyaarin weyn oo ah kulliyada iyo xirfadaha.

Digital Animation: Game Design - Xarunta Seattle ee AIE *Shuruudaha*; Dhibcaha Kubedelashada Fine Arts; dhibcaha kulliyada; shahaadooyinka warshadaha*
Koorsadani waxay diiradda saaraysaa software, hardware iyo qalab xisaabeedka loo isticmaalo si loo sameeyo video games-ka! Ardaydu waxay bartaan in ay u shaqeeyaan sidii soo saaraha software-ka oo aqoon gaar ah u leh barnaamijyada games-ka iyo naqshadeynta kombuterka. Ardaydu waxa kale oo baran doonaan fikradaha aljebra, joomateri, iyo trigonoomatari sida ay ula xidhiidhaan barnaamijyada waxqabodka kombuterka. Koorsadani waxay u adeegi karta sidii barnaamij cusub ama mid khibrad leh. The Academy of Interactive Entertainment (AIE) waa baraha hogaaminaya Horumarinta Computer Game iyo warbaahinta digitalka ee 3D.

Shaqooyinka Caafimaadka Degdega & Debdemiska - Dugsiga Sare ee Rainier Beach *Shuruud ma laha; Ma laha dhibco isku bedelashada; shahaadooyinka warshadaha*
Koorsadani waxay u diyaarisaa ardayda mustaqbalkooda sida dab damiyayaasha iyo xirfadaha adeegyada kale ee degdega ah. Ardayga ayaa awooda si uu u maareeyo naftiisa, mida dadka kale, hawlaha ama dhacdooyinka mas'uuliyada natijada fiican noqon doona, ku codsado xirfadaha hogaaminta noloshu dhabta ah, qoyska, codsiyada bulshada, iyo ganacsiga/warshadaha; iyo in la eego awoodooda si ay ugala shaqeeyaan ardayda facooda ah maaddooyinka kala duwan iyagoo ka shaqeeynaya tababarka iyo diyaarinta heerarka ugu sareeya.

Cilmiga Caafimaadka/ Caawiyaha Caafimaadka - Dhismaha John Marshall *Shuruudaha*; Saynis ama dhibcaha kubedelashada Xisaabta; shahaadada warshadaha; waa lacag dheeraada***
Isku qor Gargaarayaasha Caafimaadka, oo ah xirfada caafimaad oo si dhakhso ah u kordhaya oo qayb ka mid ah isbahaysiga caafimaadka iyo Howlaha Aqoonta Caafimaadka. Ardaydu waxay ku bartaan luqada iyo xirfadaha dhakhaatiirta iyo xirfadlayaasha caafimaadka kale, iyagoo isticmaalaya aqoonta aasaasiga ah ee u hogaaminaysa daryeelka caafimaadka iyo shaqooyinka caawinta caafimaadka. Barnaamijku wuxuu isticmaalaa mashaariida HOSA ee hogaaminta ardayda Qaranka, modules, barnaamijyada kombiyuutarka, heerka warshadaha, manhajka jaamacadda, iyo hawlaha dhibaataada ku salaysan ee goobaha dugsiga iyo warshadaha.

Takhasuska Farsamada Warbaahinta: Computer Networking – Dugsiga Sare ee Rainier Beach *Shuruud ma laha; dhibco kubadelasho ma laha; shahaadooyinka warshadaha*
Ma danaynaysaa in aad qaadato fasalada kordhinaya aqoonta Farsamada Warbaahinta adigoo wali dhiganaya dugsiga sare? Ma raadineysaa si aad u bixiso kulliyada ama u bilowdo xirfadda IT? Koorsooyinka Farsamada Macluumaadka Isgaarsiinta (ICT) Cisco CCNA iyo Microsoft Technology Associate (MTA) waxay bixiyaan shahaado warshadaha. Tani waa tallaabo weyn oo mustaqbalka. Baro qalabka PC, software, iyo nidaamyada hawlgalka iskuxirka. Hel shahaado warshadaha iyo dhibcaha jaamicadda.

Hawlgallada Badaha: Transportation & Logistics – Seattle Maritime Academy in Ballard *Ma laha Shuruudo; dhibco kubadelasho ma laha; shahaadooyinka warshadaha*
Baro sida looga shaqeeyo maraakiibta Puget Sound! Koorsadani waxay isku dhex daryasa xirfadaha casriga ah iyo kuwii dhaqanka soo jireenka ahaa ee kaluumaysiga iyo tababar gacan ku hayna iyo dayactirka mashinada. Baro waxa ay qaadato ka shaqeeynta maraakiibta kalluumaysiga, ferryboats, maraakiibta xamuulka iyo ka badan! Horumari xirfadahaada aasaasiga ah ee badaha, hirarka, maaraynta doonaha, knots, ammaanka, isgaarsiinta, radarka, saadaasha cimilada, isticmaalka qalabka, iyo dayactirka enjinka badda. Prepare for summer jobs and further training after high school that could result in Coast Guard certification.

Maritime Science & Technology: Waxsoosaarka– Dugsiga Sare ee Rainier Beach *Shuruud ma laha; dhibco kubadelasho ma laha; shahaadooyinka warshadaha*
Seattle waxa ku wareegsan shaqooyinka biyaha iyo wax soo saarka warshadaha ee badaha. Diyaari kulliyada iyo xirfadaha wax soo saarka badda. Baro badbaadada, aqoonsiga qalabka & isticmaalka saxda ah, rakibaadda guntinta, aluminium & titanium qodista birta, isticmaalka qalabka farcan ee warshadaha wax soo saarka badda, oo hel xirfad kulliyad iyo xirfado qiimo leh. Juqraafiga, xirfadaha khariidada, iyo doomaha ayaa sidoo kale lagama maarmaan u ah barnaamijkan.

Media Arts: Soo saaritaanka Video - Goobta waa la go'aamin doona *Shuruud ma laha; dhibcaha kubedelashada Fine Arts*
Koorsadani, ardayda waxay ku sii kororsan doonaan noocyo kala duwan oo xirfadaha soo saarka video iyo ku bilaabaan soosaarida iyaga u gaar ah ee faylalka tacliimeed ee Warbaahinta Farshaxanka. Ardayda waxay baran doonaan saddexda marxaladood ee wax soo saarka, oo waxay qaban doonaan wax soo saarka ay ka mid yihiin tafatirka, qoraal sheekada, dejinta goobta, nalalka, shaqada kamerada, soo saarka dhawaaqa, tilmaamida, iyo sameynta naqshadaha.

Kaaliyaha Kalkaalisada - Dugsiga Sare ee West Seattle *Shuruudaha*; Dhibcaha kubedelashada Sayniska; dhibcaha kulliyada Free TechPrep; shahaadada warshadaha; waa lacag dheeraada***
Tababarka Kaaliyaha Kalkaalisada waa tababarka dedejiinta Aqoonta Caafimaadka ee dugsiga sare ka dib, iyo waxay la xariirtaa Shaqooyinka Kalkaalisada iyo shaqo siinta sida degdega ah u kordaysa ee xanaanada. Kalkaalisada waxaa loo arkaa mid ka mid ah bilaabitaanka gelitaanka mihnadda caafimaadka. Ardayda marka hore waxay soo buuxiyaan 11 heerarka aasaaska caafimaadka qaranka, ku tijaabiyaan aqoonta aasaasiga ah iyo xirfadaha fasalkooda iyo goobta bukaan eegida, ka dibna galaan imtixaanka shatiga oggolaanshaha gobolka. Hoggaanka Qaran ee HOSA, waxbarashada dhibaataada ku dhisan, iyo waayo-aragnimada bukaan eegida waxay bixiyaan fursado.

Akadeemiyadda Waxbaridda/Shaqooyinka Waxbarashada - Dugsiga Sare ee South Lake *Shuruud Ma laha; dhibcaha isubedelashada ma laha; shahaadooyinka warshadaha*
Koorsadani dhamaystiran waxay idin siin doontaa safarka sahaminta dunida waxbarashada iyo shaqada waxbarashada iyo goobta waxbarashada. Iyada oo si gacan kuhayna loo baranayo, ayay koorasan waxay bixin doontaa fursad ay ku helaan waayo-aragnimo ka shaqeeynta goobaha kala duwan ee waxbarashada iyo diyaarinta guusha barnaamijyada sare ee waxbarashada kuwaas oo keeni kara dariiqo shaqada mustaqbalka ee sida sare loogu baahan yahay. Waxayna keeni kartaa fursado shaqo oo ay ka mid yihiin daryeelka caruurta, caawiyaha waxbaridda, macalinka, maamulaha, iyo la-taliyaha dugsiga.

Xarunta Dugsiga Xirfadaha Xagaaga 2017

Hel .5 dhibcood oo dugsiga sare ah xagaagan. Waxbarasho gacan ku hayna oo BILAASHA . Oo u furan dhammaan ardayda SPS ee galaya fasalladda 9aad-12aad. Ka fiiri skillscenter.seattleschools.org wixii macluumaad dheeraad ah.

***Ka fiiri Website-ka ama la taliyaha liiska shuruudaha **Caawinad Dhaqaale ayaa la heli karaa.**